

Xiriiriyeyaasha Ka Hortagga Dambiyada



Xiriiriyeyaasha Ka Hortagga Dambiyada Xiriiriyeyaasha Ka Hortagga Dambiyada (Crime Prevention Coordinators-CPCs) waxey waayo arag ku yihiin tabaha looga hortago dambiyada. Fadlan nala soo xiriir haddaad heyso xogo, ama aad dooneyso inaad ku lug yeelato ama aad abuurto koox Ilaalisa waax xaafadeed, ama inaad dalbato joogitaankooda kulan bulsho oo nagu soo food leh ama inaad ka hadasho dareen ka jira xaafaddaada.

Wax ka Ogow Waaxdaada CPC:



seattle.gov/crime-prevention

War gelin

Markasta soo wac 9-1-1 wixii ku saabsan

- Boolis, dab-damis, ama xaalad khatar caafimaad.
- Xaalada khatar oo halis ku ah nolosha, hanti dhul, ama labaduba.
- Dambi culus sida dhac, dagaala gacan ka hadal, ama weerar galmo.
- Fiilo koronto oo dhulka soo dhacday.

Caawimaad luqadda oo ku saabsan soo sheegidda xaalad emerjensi ah, soo wac 911 adigoo sheegaya luqadda aad u baahan tahay, si lagugu xiro tarjumaan.

Tusaale: dheh Isbaanish, ama Fiyetnaamiis

- Wax badan ka ogow iskuna qor barnaamijka Smart911 si aad ugu caawinto dadka telefoonada kaa qabta (Call Takers) iney heli karaan warbixinno waxtar leh ee adiga kugu saabsan, ama familkaaga iyo gurigaaga, oo ay ka mid yihiin xaaladahaaga caafimaad. Ka hel warar intaa ka badan Smart911.com
- Xaaladaha aan deg-degta aheyn.
- Dambiyo hore: Soo sheegidda dambiyo hore (falal aan hadda gacmaha lagula jirin) oo ay ku jiraan xatooyo, jabsi, been abuur, waxyeelo hanti, buuq, ama hanti luntay u soo wac (206) 625-5011, ama ku soo wargeli onleenka Waaxda Booliiska (Seattle Police Department).
- Gawaarida: Haddii gaarigaaga la xaday, isku day inaad soo wacdo (206) 625-5011. Haddii qof kula hadla aad weyso, wac 9-1-1 xittaa haddii xatooyada ay hore u dhacday. Ku soo wargeli shilalka gawaari webseytka waaxda Washington State Patrol, barta QR code-ka ee hoos ka muuqata.
- Korontada oo tagta: Soo wac lambarka Seattle City Light ee (206) 684-3000. Halkaa ka eeg maabka imika korontadu ka maqan tahay, adigoo taabanaya barta laga heli karo QR code ee hoose.
- Adeegyada Bulsho: Wac 211 si dhibaatooyin wax looga qabto, caawimaad lagama maarmaan u ah nolosha, raashin, guryaha, caafimaadka, daryeelka caruurta, barnaamijyada iskuulka ka bacdi, daryeelka waayeelka, iyo waxyaabo intaa ka badan.
- Caafimaadka Madaxa: Wac, takisti garee, ama la hadal 988 si aad ula xiriirto Leenka Nolosha haddii ay jiraan Isku-day is Dil iyo Musiibooyin. Leenka Nolosha 988 waa qarsoodi, waa lacag la'aan, waana diyaar 24/7/365.
- Xaaladaha Kale ee Magaalada: Si aad ugu soo wargeliso arrimo la xiriira xayawaanka, qashin qubis, bannaan seexad, kaabayaal, iyo wixii kale ee aan imerjensi aheyn usoo wac xafiiska u adeegga macaamiisha (Customer Service Bureau) ee (206) 684-2489, adigoo isticmaalaya app-ka "Find It, Fix It", ama isticmaal webseydka Customer Service Bureau si aad u dalbato adeegyo kala duwan.
- Wax ka Qabadka Baarkinada: Wac (206) 386-9012.
- Aagga Ballaaran ee Imerjensiyada
- Xaalad ku saabsan aag-ballaaran oo imerjensi ah, ha isticmaalin telefoonkaaga dhowrka saacadood ee ugu horreeya marka wax dhacaan haddii aaney jirin khatar halis ku ah nafta ood u baahan tahay inaad wacdo 9-1-1.

Adeegyada kale onleenka ee waxtarka ah:
www.seattle.gov/police/cpc-qr-resources



**SPD Crime
Prevention**



SEATTLE POLICE FOUNDATION
Partnership for a Safe Seattle

6/2024 V.1